UW Medicine

Gacaliye bukaanka,

Daryeelka Asaasiga ah ee UW Medicine waxaa ka go'an inay ku siiso daryeelka caafimaad ee ugu wanaagsan ee suurtogalka ah. Mid ka mid ah siyaabaha aanu tan u sameyno waa in aan dib u eegis ku sameyno diiwaankaaga caafimaad waqti ka waqti si aan u hubinno in ay kuu dhamneystiran yihiin baaritaannada aad u baahan tahay, oo ay ku jiraan baaritaanada kansarka. Qaar ka mid ah baaritaannadan ayaa hore u heli kara kansar marka ay sahlan tahay in la daweeyo oo nafta la badbaadiyo!!

Markii aan dhawaan dib u eegis ku samaynay diiwaankaaga caafimaad, waxa aanu ogaanay in aad u baahan tahay baadhista kansarka mindhicirka sanadkan. Kansarka mindhicirka (kansarka mindhicirka iyo malawadka) waa kansarka saddexaad ee ugu badan Maraykanka, Ururka Kansarka Maraykanka (ACS) wuxuu ku talinayaa in qof kasta oo da'diisu tahay 45 jir iyo ka weyn laga baaro kansarka mindhicirka.

Si aan kaaga caawino inaad caafimaadkaaga ku hayso sida ugu wanaagsan, waxaan rabnaa inaad ogaato ilaa 2 doorasho oo baadhis ah oo lagu ogaanayo kansarka mindhicirka goor hore:

1. **FIT (Baadhitaanka Immunochemical ee Saxarada)**: Waxaad ku samayn kartaa baaritaankan guriga, uma baahnid inaad si gaar ah ugu diyaargarowdo.Baaritaankani waxa la isticmaalaa muunad ama sambal saxaro ah oo aad noo soo dirto. ACS waxay kugula talinaysaa inaad ku celiso baaritaankan sannadkii hal mar.
2. **Colonoscopy (Mindhicir-fiirin)**: Habkan waxaa sameeya takhtar gaar ah oo loo yaqaan 'gastroenterologist'(dhakhtar ku takhasusay caloosha iyo mindhicirada). Waxaad u baahan doontaa inaad isu diyaariso 2 maalmood ka hor baaritaanka. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad qaadato daawo hurdeysiiso ah ama suuxin (daawo kaa caawinaysa inaad nasato) marka la sameynaayo habkan. Haddii natiijooyinku caadi yihiin, ACS waxay kugula talinaysaa inaad ku celiso baaritaankan 10-kii sanoba mar.

Haddii aad doorbidayso in laguu sameeyo baarista kamaro-ku-fiirinta mindhicirka (colonoscopy), hore ugu dhamaystirtay baaritaanka FIT meel kale, leedahay taariikhda qoyska ee kansarka mindhicirka, ama aad isku aragto calaamado ay ka mid yihiin dhiig saxarada la socda ama isbedel ku yimaadda saxarada, fadlan nala soo xidhiidh si aan kaaga caawino cusboonaysiinta diiwaankaaga ama kuugu helo barnaamij baadhis ah oo ku shaqayn doona.

Waxaad kala xidhiidhi kartaa khadkayaga UW Medicine 206.520.5000 ama waxaad kala xidhiidhi kartaa kooxdaada daryeelka onlaynka MyChart.

Rachel Issaka, MD, MAS
Gudoomiyaha Sinaanta Caafimaadka ee Kathryn Surace-Smith Endowed
Kaaliye Barre Sare, Jaamacadda Washington
Qaybta Caloosha-mindhicirka iyo Beerka
Agaasimaha, Baadhitaanka Kansarka mindhicirka iyo malawadka ee Caafimaadka Dadweynaha

UW Medicine